

Ogalaanshaha Ohio State University ee Ka-qaybgalka Cilmi-baadhis

Magaca Daraasadda:

Waxa lagaa codsanayaa inaad ka qaybgashid daraasad cilmi-baadhis ah.

Ka hor inta aanad ogalaan, waa in cilmi-baadhuhu kuu sheego arrimahan:

- Sababta loo qabanayo daraasadda
- Waxa dhici doono iyo mudada lagu weydiisan doona inaad ka qaybgashid daraasadda
- Wixii hawlgalo ah, oo sababta keliya ee looqabanayaa tahay daraasadda ayaad ku jirtaa
- Wixii ah halis ama raaxo-daro ee aad ka filan kartid ka-qaybgalka daraasadda
- Faa'iidooyinka suurogalka ah ee adiga ama dadka kale heli karaan
- Ikhtiyaarada kale ee kuu furan ee aan ahayn ka-qaybgalka daraasadda, iyo
- Sida loo asturi doono warka adiga kugu saabsan ee la helo ee ku jira daraasadda.

Iyada oo ku xidhan daraasadda, waa in sidoo kale uu cilmi-baadhuhu kuu sheego wixii ku saabsan:

- Lacag-bixin kasta ama daweyn caafimaad kasta oo la heli karo haddii waxyeelo kaa soo gaadho daraasadda,
- Suurogalka inay iman karaan halisyo aan lagu talo-galin,
- Goorta uu cilmi-baadhuhu kaa joojin karo inaad ka qaybgashid daraasadda,
- Maxaa dhici doona haddii aad go'aan ku gaadhid inaad joojisid ka-qaybgalka daraasadda,
- Goorta lagu sheegi doono wixii ah natiijooyin cusub ee saameyn kara go'aankaaga inaad sii wadid ka-qaybgalka daraasadda,
- Wixii ah kharashyo soo kordhay ee lagu saari karo, iyo
- Inta qof ee ku jiri doona daraasadda.

Waad dooran kartaa haddii aas ka qaybqaadanaysid daraasaddan. Waxa aad dooran kartaa inaanad ka qaybqaadtid daraasaddan. Haddii aad go'aan ku gaadhid inaad ka qaybqaadtid daraasaddan, wakhti kasta ayaad ka bixi kartaa daraasadda. Go'aan kasta ood gaadhid, ma jiri doono wax ganaax ah oo lagu saarayo. Kaamana lumi doonaan mid ka mid ah faa'iidooyinka ama gargaarka aad caadi ahaan heli jirtay.

Wixii ah su'aalo, walaac, ama cabashooyin ee la xidhiidha daraasadda waxa aad kala xidhiidhi kartaa _____ oo laga helo _____.

Wixii ah su'aalo ee ku saabsan xuquuqdaada marka aad tahay qof ka qaybgalaya daraasaddan, wax aad kala xidhiidhi kartaa Ms. Sandra Meadows oo joogta Office of Responsible Research Practices lagana helo 1-800-678-6251. Waxa aad wici kartaa lambarkaa si aad qof aan ka tirsanayn kooxda cilmi-baadhista ugala hadashid wixii ah walaac ama cabashooyin ee ku saabsan daraasadda.

Haddii dhaawac ku soo gaadho iyada oo sababtu tahay ka-qaybgalka daraasadda, waxa aad la xidhiidhi kartaa _____ oo laga helo _____.

Saxeexidda warqaddan macnaheedu waxa weeye in daraasadda lagu sharaxay. Waa in lagu siiyo fursad aad ku weydiisid su'aalo. Ka hor inta aanad dooran inaad ka qaybqaatid daraasadda, waa in lagaaga jawaabay dhamaan su'aalahaaga.

Ma jiraan wax xuquuq sharci ah oo aad ka tanaasulaysid marka aad saxeexdid warqaddan. Waxa nuqul ama koobi lagaa siin doonaa warqaddan. Waxa kale oo lagu siin qoraal kooban ah oo ku saabsan daraasadda.

Magaca la-baadhaha oo ah xuruuf kala go'an

Saxeexa la-baadhaha

Subaxnimo/Galabnimo

Taariikh iyo wakhti

Magaca markhaatiga oo ah xuruuf kala go'an

Saxeexa markhaatiga (waa la rabaa)

Subaxnimo/Galabnimo

Taariikh iyo wakhti